

Waalidiintu waxay firfircooni ku noqon karaan inay horumariyaan luuqada (hadalka) ilmamahooda iyaga oo isticmaala:

- U akhriya ama la hadla wixii markaas ay buuga uga jeedaan ee afkoodahooyo.
- Iyaga oo kala hadla wax ay wadajir hore u sameeyeen tusaale iyaga oo booqday meel kuna ha hadlaaya afkooda hooyo.
- Ku heesa afkooda hooyo.

Baaritaan la sameeyay waxa la ogaaday in ay qaadanayso in luuqad cusub aad barato ilaa 2 sano taasoo kuu sahli kartaa hadalada macaamiisha aan isticmaalno maalin kasta. Anaga waxa aan iska dhaadhicina in ilmuhu si fiican ugu dhawaaqaan luuqada noorweejiga oo luuqada ay ku fiican yihiin. In luuqad aad si aad u taqaan oo la oran karo qofkani luuqadan wuu yaqaanaa oo wax ku baran karo waxay qaadanay 5 ilaa 7 sanadood

Boos xannada caruurta

Waalidiinta waa in ay caawiyaan ilmaha si ay u helaan meel ay ka heli karaan luuqada norweejiga . taana waxa laga heli karaa uun xaruunta xanaanada caruurta iyo xaafada kugu dhow. Fredrikstad waxa jira xarunxanaanada caruurta ah oo furan oo ilmo kale ay la kulmayaan oo waalidka in ay meesha la joogaan caruurtooda , laakiin waxa jira xarumo xannanada caruurta oo laga helo kommuunk fredrikstad oo dhan.

Macluumaad ku saabsan xaruumaha xanaanada caruurta ee Fredrikstad waxa aad ka heli kartaa cinwaanka khaaska ah ee kumuunka oo ah : www.fredrikstad.kommune.no

- Adiga ayaa codsan boos xanaanada caruurta elektronisk.
- Goobta caawinaada ee xarunta magaalada laga maamulo(Rådhuset axa aad waydwiisan kartaan caawinaad habka loo codsado boos xanaanada caruurta.
- Waa muhiim in aad codsataan boos xanaanada caruurta **ka hor 1.mars sanad walba.**



Somalisk

Luuqada ilmaha (caruurta)

Wada hadalka ayaanu ku branaa oo ku fahmnaa caalamka



Xiriirka iyo isgaarsiinta

Laga bilaabo marka ilmuhu dhashaan waxa dhaca isbedello xaga jirka iyo maskaxda.

Aasaaska horumarinta hadalka waxa laga soo bilaabaa sanadaha ugu horeeyo nolashooda.

Barashada luuqada waa waxa ugu muhiimsan ee ilmuhu nolashooda la kulmaan.

Ilmaha waa u diyaar xiriir iyo isgaarsiin laga soo bilaabo marka ay dhashaan.

Luuqadu waxa ay sameeyaa xiriirka dadka kale. Luqada waxa ay ku siinaysaa aqoonsi iyo xigsasho.

Ka hor inta ilmuhu gartaan ama fahmaan wax alla wax erey macnihiisu yahay, waxay khibrad u yeeshaan hadalka dhawaaqiisa ama xiinkiisa in ay thay wax is leh dhammaan xaaladaha.

Qofka wanaagsan ee masuulka ka ah waxa uu ilmahadhashay ugu qubaynaa ama meydhaa hadaldhawaaqiis ama xiinkiisa:

- Hadal iyo hees.
- Ilmaha (caruurta)waxa ay la jaanqaadaan hadalka iyo la shaqynta dadka kale.
- Barashada luuqad waa wax aad uga fog in la barto erey.
- Waa muhiim waxa loo isticmaalayo luqada in la barto iyo sida loo isticmaalayo.
- Anaga waxaan u isticmaalnaa hadalka xiriir joogto ah iyo marka aan dan ku fulsanayno.
- Caruurta waxa ay isku dayaan inay hadlaan oo ay bartaan luuqad waa in ay dareemaan in la fahmay oo ay gaarsiyeen wixii ay sheegeen.
- Qofka wayn waa in uu ahaadaa ruux firfircoon oo maqlaya qiraya in uu gartay waxa ilmuhu ay rabaan haddii qofka wayni uu yahay lab ama dhedig.

Waalidka wax wayn ayay ilmaha u qaban karaaninay fursado badan oo ay ku horumarinayaan luuqada ama hadalka ilmaha.

- U hees ilmaha
- La ciyaar ilmaha
- U akhri ilmaha oo u sheeg waxa aad u akhrinaysid ama sawirka aad arkaysaan.
- U sheeg mawaadiicda ama waxyaabaha aad wada samaysaan badanaa.

Luuqado badan

Maskaxda waxa ay awood u leedahay in ay barato wax ka badan hal luuqad. Way haboon tahay in ilmaha ay la kulmaan luuqado kala duwan hal waqti.

Afka hooyo waa luuqada loo aqoonsan yahay in ay tahay tan ugu horaaysa ilmuhu bartaan iyo in ay tahay ta lagu aqoonsanaayo.

luuqad waliba waxa ay xambaarsan tahay dhaqan oo qiimaheeda wadata .

afka hooyo waa wax qofka gaar u ah.

Waalidka waxa lagu dhiirgelinee in ilmaha ay la hadlaan oo ay u sheegaan ereyo cusub oo sarbeeb ah , ahna luuqada ay aygu si fiican u garanayaan. luuqad afkahooyo qofka haddii si fiican uu u yaqaano waxay u sahleysaa qofka in uu barto luuqad kale.

In la barto luuqad cusub waqti ayay qaadanay

Waalidiinta oo dhan waxay rabaan in caruurtooda waxbarshada ku najaxaan. Sidaas darteed waalidiinta badankood waxay jecel yihiin in caruurtooda bartaan afka noorweejiga inta ay yaryihiin. Taa micnaheedu ma aha in waalidku aysan ilmahooda ula hadlin afkahooyo.

